



1692

## School Site Councils

*Policy 1692*

Original Adoption: 2/25/1992  
Revision Dates: 06/04/2002  
Review Dates:

Effective Date: June 5, 2002

### **I. UJEEEDADA**

Xubnaha Guddida Waxbarashada Dugsiyada Dadwayanaha Minneapolis waxa ka go'an in ay siiso taageero dugsi kasta iyo barnaamij kasata oo ka mid ah oo leh halaburnimo iyo wanaag. Dadaalka wadjirka ah ee ardyada, macalimiinta, waalidiinta, maamulayaasha, beesha degaanka iyo shaqaalaha xafiiska dhexe ee taageerada ardayada hor umarkooda in uu yahay muhiim si ay u gaaraan heerka waxbarsho ee looga baahanyahay iyo heerka bulshaynimo ee ay u baahan yihiin in ay joogaan, Wada jirk ama wada shayqanta dhamaan kuwa danaynaaya waa muhiim si loo gaaro heerka shaqada degmada, aragtida iyo qorshaha ahdaafata istiraatiijiyadeed. Soo ururinta talooyinka beesha degaanka dugsiyada kuwa danaynaaya si loo hore mariyo guulaha waxbarsho, kuwa shacuureed iyo koritaanka bulshaawinimo ee ardayada ee aada dugsigaasi in uu yahay mid qiime leh, muhiimna ah si loo kordhiyo dadaalka ku aadan horeumarinta iyo joogtaynta koritaanka iyo hore umarka ardayga. Wakiilka socda guddida daneeyayaasha dugsiyada ayaa ah sida ay Xubnaha Guddida Dugsiyadu ay u aamin sanyihiin in ay soo saari doonto talo ay siyaan dugsiyada. Ujeedada qorshahan ayaa ah in la sameeyo xayndaab kaasi oo ka yeeli doona in la abuuro guddiyo dugsiyeed kuwaasi oo saamyant doona go'aano ku salaysan dugsiyada.

### **II. BAYAANKA GUUD EE NIDAAMKA**

- A. Degmo kasta oo maamusha dugsi waa in ay samaysaa wakiilo matala guddiga ah ee dugsiya ujeedaduna tahay in la dhaqan galiyo nidaamkan.
- B. Guddida ah ee dugsiya waa in ay ku shaqaysaa asaaska xeer ay samaysteen, Xeerkaasana waa in uu ogolaadaa nidaamkan iyo nidaamyada kale ee munaaskabka ah ee degmada.
- C. Kormeeraha guud ayaa loo ogolyahay in uu sameeyo qaab xereed la raaco si uu u hago guddida ah ee dugsiya marka la samaynaayo xeerka hoosaadkooda. Xeerka ay qaataan waa in ay u soo diraan kaaliyaha Kormeeraha guud ee munaasabka ah si loogu sameeyo dib u eegis.
- D. Kormeeraha guud ama cida uu u xil saaray ayaa leh awooda dugsiya, marka laga reebo wax si gaar ah loogu cayimay guddida dugsiya sharciyana la soo mariyay Xubnaha Guddida Dugsiyada Dadwaynaha Minneapolis
- E. Dugsiyada la siiyay is maamul gaar ah kaasi oo uu oglaaday Kormeeraha guud waa in lagu maamulo qoraalkii la isku afragarat ee dhex maray Kormeeraha guud iyo Guddida ah ee Dugsiya.



### III. KA MID NOQOSHADA XUBINIMO IYO QAABKA LOO XULAAYO

- A. Maamulaha waa in uu xubin ka noqdaa guddida ah ee dugsiga.
- B. Laga bilaabo faslka ka hooseeya *Kindergartner*-ka -ka ilaa faslka 8-aad waxaa waajib ah in ay ka mid ahaadaan xubnaha guddida dugsiga qodobada soo socda:
1. Waalidiin ay ka muuqato asalka, qowmiyda iyo dhaqanka, luqada iyoowooda kala duwanaanta ee ay kooban yihiin ardaydu.
  2. Shaqaale liisamo leh oo ka kal socda qaybaha kalduwan ee dugisga heerarkiisa kal duwan, (tusaale ahaan, faslada dugisga hoose iyo kuwa dhexe) waxbarshada khaaska ah iyo faslada kuwa afka Ingriisida barta sidoo kalana asalka, qomiyadnimada iyo dhaqanka kala duwan ee shaqaalaha.
  3. Kuwa aan liisnka lahayn eek a soo jeeda asalka ,qowiyadaha iyo dhaqanada kala duwan ee shaqaalaha.
  4. Ugu yaraan hal qof oo ka tirsan beesha oo degan meel ku dhaw dugsiga am aka ka tirsan hawlwadeenimada xaafada .
- C. Faslka ka horeehya *Kindergarten*-ka ilaa fasalka 8-aad ardayada dhigata waa suurta gal in lagu soo daro guddida ah ee dugsiga.
- D. Dugsiyada sare waa in ay ku jiraan guddida joogatada ee dugsiga sida soo socota:
1. Waalidiin ay ka muuqato asal kala duwanaanta , qowmadyinmada, luqada awooda iyo dhaqanka kala duwan ee ardaydu ka kooban yihiin.
  2. Shaqaale liisamo leh kuwaasi oo matala dhinacyada kala duwan,, waxbarashada khaaska ah , kuwa barta afka Ingiriisida, iyo kala duwanaanta shaqaalaha asal ahaan, qowmiyad ahaan iyo dhaqan ahaanba..
  3. Kuwa aan liisnka lahayn eek a soo jeeda asalka ,qowiyadaha iyo dhaqanada kala duwan ee shaqaalaha..
  4. Ugu yaraan hal qof oo ka tirsan beesha oo degan meel ku dhaw dugsiga am aka ka tirsan hawlwadeenimada xaafada .
  5. Arday.
- E. Guddiyada joogatada ah ee dugsiyada shaqaalah dugsiyada waa in aanu xubin nimadoodu ka badanaan 60% kana yaraan 40%, Dugsiyada sare waa in ay shaqaalahu ka badanaan 60% , waa xubin nimada guddida joogata ah ee dugsiyada kana yaraan 33% hoose waa in Dugsiga hoose waa in ay ku jiraan guddida ah ee dugsiga, waa in lagu dadaalaa in la abuurro wakiilnimo isu dheeli tiran oo ah shaqaalaha, ardayda iyo waalidiinta.
- F. Qaabka doorashadu waa in uu ahaadaa mid ku salaysan xeerka guddida joogta ah ee dugsiga, waana ay kala duwanaa kartaa ka mid noqoshada xubinimo. Qaabka ay



guddida dugsigu u ku xulayaan xubin nimada waa in ay ahaato mid natijadeedu inteeda badan noqota calaamadaha lagu matli lahaa in guddida xubin laga noqdo.

#### IV. WAAJIBAADKA GUDDIDA JOOGTA AH EE DUGSIGA

- A. Hadii aan si kale loo xil saarin oo aan nidaamku guddida waxbarashadu , kormeerha, ama heshiis qoraal madax banaani ah ah oo la galay, shaqada guddidu wax ay noqonaysaa sudan
1. Talo siinta maamulaha dugsigu waxyaabaha go'aanka u baahan ee dugsigu.
  2. Dib u eegida heerka waxbarshada ee ardayada iyadoo lagu salaynaayo akhbaarta la soo ururshay lana kala saaray loona sameeyay kooxo kala duwan ee dugsigu ujeedaduna tahay talo siinta shaqaalaha waxyaabaha ay ka koobantahay Qorshaha Horumarinta Dugsiga( *School Improvement Plan (SIP)*).
  3. Ka talo bixinta gunada dakhliga waxbarsho, sida eray bixintani ay ugu qeexntahay sharciga Minnesota, ee loo qoondeeyay dugsiyada iyadoo loo diyaargarooabaayo misaanayada sannadka.
  4. Talo siinta maamulaha dugsigu in isticmaalo miisaaniyada loo qoondeeyay si loo taageero ahdaafta Qorshaha Horumarinta Dugsiga SIP.
  5. Ilaalinta isticmaalka miisaaniyada dugsigu si dhaqaalaha loola beegsado hawlihii lagu bixin lahaa taasi oo dhali doonta hagaaga waxbarshada ardayga sidii lagu sheegay SIP-ga.
  6. Tali siinta maamulaha ee la xiriirta socod siinta shaqada iyo sharciyada dugsigu.
  7. La xiriirka si joogta ah eel ala xiriiraayo beesha dugsigu waxyaabaha ku saabsan go'aamada dugsigu iyo go'aamada raadaynaaya dugsigu.
- B. Ugu yaraan sannad dugsiyeedkiiba , waa in uu u qabtaa shir dhamaan kuwa daneeya dugsigu ujeedaduna tahay in laga helo talooyin iyo tacliqyo laga bixiyo heerka waxbarshada ay joogto iyo qaabkii loo horemarin lahaa, sida hawshu uga socoto dugsigu ee ay ugu socoto ardayda, waalidiinta iyo waxyaabaha kale ee ee dugsigu u arko in ay tahay muhiim.
- C. The School Site Council does not have the authority to make decisions that are not specifically delegated to it, nor may it make decisions that are contrary to the goals and the policies of the Board of Directors or the Superintendent's regulations or priorities.
- D. Iyadoo ay ku salaysatahay sharciyada Minnesota , Xubanaha Guddida Waxbarashada, ma aha guddida ah ee dugsigu, iyaga ayaa ka masuul ah lag galida heshiisyo iyo sida loo bixinaayo dhamaan dakhliga ay hesho degmadu ama mid kastoo ka mid ah dugsiyadeeda ama barnaamijyadeeda oo waafaqsan nidaamka degmada.

---

**V. WAAJIBAADKA XUBNAHA GUDDIDA DUGISIGA**

- A. Xubin kastaa oo ka tirsan guddida waxa ay matashaa qayb ka mid ah dugsiga , kuwa daneeya dugsiga iyo in ay masuul ka yihiin qaybtaa ay matalaan ee ah kuwa danaynaaya dugsiga in ay wakil u yihiin walaaca qaybtaasi guud ahaaneed.
- B. Mid kasta oo ka mid ah xubnaha guddida waa in ay la xiriiraan qaybta dugsiga ee ay matalaan si ay talooyin uga helaan una soo ururiyaan walaaca ah in guddidu ka fiirsato.
- C. B. Mid kasta oo ka mid ah xubnaha guddida waa in ay la xiriiraan qaybta dugsiga ee ay matalaan oo ay kala xiriiraan go'aamadii ay gaareen iyo samaynta go'aamo ku salaysan dugsiga.
- D. Xubin walaba waa in ay u shaqayso danta dhamaan ardayda dhigata dugsiga.l.

**VI. MASUULIYADAHA**

- A. Kormeeraha guud waxa uu awood u leeyahay in u faafiyo in sharciyadanidaamkan in la dhaqan galiyo .
- B. Maamulaha ama meelaha aan lahayn maamule guddi kastaa waa ka masuul hubinta in dhamaan go'aamda dugsiga la jaan qadaan kuwa Guddida Waxbarashada iyo waxyaabaha uu Kormeeraha guud ahmiyada siinaayo.
- C. The Superintendent shall initiate a method of accountability for the implementation of this policy.
- D. Kormeeraha guud waa in uu hor keeno guddida warbixino qoraal ah kuwaasi oo uu kaga waramaayo dhaqan galinta nidaamkan kaasi oo ay ka mid tahay qaab dhismeedaka bulshada dugsiga iyo siyaabaha ay u kala duwan yihiin xubnaha ku jira guddida dugsiga.

***Tixraacayada sharciga:***

Minn. Stat. §123B.04 (Site Decision Making; Individualized Learning Agreement; Other Agreements)

Minn. Stat. §126C.15 (Basic Skills Revenue; Compensatory Education Revenue)

***Cross References:***

MPS Policy 1040 (Student and Staff Data Protection)

MPS Policy 1150 (Media Relations)

MPS Policy 1310 (Parent-Teacher Association...and Other School-Community Organizations)

MPS Policy 1450 (Volunteers)

MPS Policy 1541 (Response to Violence and Disruption)

---

Special School District No. 1  
Policy 1692

Minneapolis Public Schools  
1250 Broadway Ave. W., Minneapolis, MN 55411

<http://www.mpls.k12.mn.us>

S:\Site Council Policy Work\Policy\_1692.Somali.docx



MPS Policy 2100 (Superintendent: Roles and Responsibilities)  
MPS Policies 3000-3004 (Code of Ethics)  
MPS Policy 3120 (Budget Preparation)  
MPS Policy 5460 (Dress)  
MPS Policy 6000 (Mission of the Educational Program)  
MPS Policy 6110 (Academic Goals)  
MPS Policy 7960 (Naming Schools and District Property)

---

Special School District No. 1  
Policy 1692

Minneapolis Public Schools  
1250 Broadway Ave. W., Minneapolis, MN 55411

<http://www.mpls.k12.mn.us>

S:\Site Council Policy Work\Policy\_1692.Somali.docx